

Xayiraadaha lama huraanka ah

Tallaabooyinka caafimaadka bulshada ee lama huraanka ah ayaa ka socda guud ahaan Alberta si loo joojiyo kororka KOOFID-19 loona ilaaliyo nidaamka caafimaadka.

Dulmar

Xanibaadaha caafimaadka bulshada ee lama huraanka ah ayaa ka jira gobolka oo dhan. Xaddidyo dheeri ah ayaa lagu dabaqayaa bulshooyinka leh kiisaska sare ugu yaraan 50 kiis 100,000 qofkiiba iyo ugu yaraan 30 xaaladood oo socda.

Bulshooyinka leh kiisaska hoose ee socda waa inay sii wadaan raacida dhammaan xaddidaadaha gobolka oo dhan.

Xayiraadahani waxay sii jirayaan ugu yaraan 3 toddobaad, xitaa haddii bulsho ka gudubto marinka ka hooseeya.

Ka eeg xaalada kiisaska socda ee gobolkaaga. ([See active case rates in your region](#))

Kulamada

Kulamada gudaha

Dhamaan kulamada bulshada ee gudaha lama ogola.

- Dadka keligood nool iyo waalidiinta kelida ah ee kaliya la nool carruurta ka yar 18 sano jir waxay dooran karaan laba qof oo ay booqan karaan inta lagu jiro xayiraadahaas.

Isu imaatinada banaanka

Dhamaan kulamada bulshada ee banaanka ka dhacaya waa inaysan laheyn qeyb gudaha ka ah waxayna ku egtahay:

- 5 qof ugu badnaan meelaha kiisaska sare

- 10 qof ugu badnaan meelaha kiisaska hoose

Aroosyada iyo aaska

- Aroosyada iyo soo dhaweynta aaska lama ogola.
- Xafladaha arooska waxay ku kooban yihiin 10 qof.
- Howlaha aaska waxaa lagu soo koobay 10 qof oo ku sugan meelaha kiisaska sare ay ka jiraan, iyo 20 qof oo ku sugan aagagga kiisaska hooseeya leh.

Goobaha cibaadada

Imaanshaha qofka ee dhammaan goobaha cibaadada waxay ku egtahay:

- 15 kaqeybgalayaal ugu badnaan meelaha kiisaska sare
- 15% degganaanshaha lambarrada dabka ee meelaha kiisaska yaryar
- Xirashada afxirka waa lama huraan.
- Dadka ku jira hal guri waa inay ku ekaadaan laba mitir guryaha kale ku jira mar walba.

Af xirashada

- Afxirka waa lama huraan dhammaan meelaha guud ee gudaha, goobaha shaqada iyo goobaha cibaadada.

Kahortaga gudbinta goobta shaqada

- Ka shaqeynta guriga waa lama huraan gobolka oo dhan illaa loo shaqeeyo u baahan joogitaanka shaqaalaha inuu si wax ku ool ah u shaqeeyo.

Learn more at alberta.ca/CovidTranslated

- Meelaha kiisaska sarsare ka jiraan, goob kastoo shaqo oo 3 ama ka badan kiisaska laga helo waxaa looga baahan doonaa in la xiro 10 maalmood. Kaamamka shaqada, adeegyada aasaasiga ah iyo kuwa muhiimka ah kuma jiraan.

Xayiraadaha ganacsiga

Goobaha madaddaalada

- Xarumaha madaddaalada waa inay xirnaadaan gobolka oo dhan. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah tiyaatarada, baararka, meelaha lagu caweeyo, matxafyada iyo maktabadaha.
- Hoolalka bulshada, hoolalka marti galinta iyo xarumaha shirarka ayaa loo furi karaa howlaha hadda la ogol yahay.

Adeegyada cuntada

Makhaayadaha, baararka, qolalka nasashada iyo mehradaha ayaa loo furi karaa meel laga qaato, laga soo qaato ee laamiga dhiniciisa, iyo u geynta oo keliya. Adeeg gaar ah, oo ay kujirto cunada barxada lagu cuno, lama ogola.

Adeegyada tafaariiqda

Dhammaan adeegyada tafaariiqda iyo suuqyada laga dukaameysto waa inay yareeyaan tirada macaamiisha, oo aysan ku jirin shaqaalaha:

- 10% degganaanshaha lambarrada dabka ee gobollada kiisaska sarreeya
- 15% degganaanshaha lambarrada dabka ee gobollada xaaladaha hooseeya leh

Adeegyada caafimaadka iyo xirfadeed

Adeegyada caafimaadka iyo xirfadeed waxay ku furmi karaan ballan oo keliya adeegyada qof qofka ah. Dhamaan tilmaamaha caafimaadka bulshada iyo waaxda waa in la raaco.

Tusaalooyinka waxaa ka mid ah dhakhaatiirta ilkaha, dhakhaatiirta indhaha, daaweeyayaasha muruqa, qareennada iyo xisaabiyeyaasha.

Adeegyada gaarka ah iyo faydaqabka

Adeegyada gaarka ah iyo faydaqabka waa inay gabi ahaanba xirmaan marka laga hadlayo meelaha xaaladaha sare ka jiraan. Xaaladaha hoose ee meelaha kale waxay ku sii furnaan karaan ballan kaliya.

Tusaalooyinka waxaa ka mid ah timaha iyo meelaha lagu qurxiyo ciddiyaha, qolalka cilaan saarka iyo adeegyada qurxinta.

Waxqabadka, isboortiga iyo dhaqdhaqaaqa jirka

Hawlaha gudaha

- Dhamaan cayaaraha gudaha, madaddaalada iyo waxqabadka lama ogola gobolka oo dhan.
- Dhammaan xarumaha jimicsiga ee gudaha waa inay xirnaadaan (oo ay ku jiraan tababarka mid-ka-fool ah).

Hawlaha bannaanka

- Meelaha kiisaska sare, dhammaan jimicsiga bannaanka, madaddaalada iyo waxqabadka waa lama ogola meelaha sare, marka laga reebo xubnaha qoyskaaga ama labada qof ee kuugu dhow haddii aad keligaa nooshahay.
- Xaaladaha kiisaska hooseeya, jimicsiga bannaanka ee xaddidan, madaddaalada iyo waxqabadyada waxaa loo oggol yahay 10 kaqeybgalayaal ugu badnaan iyo lama huraana ah kala fogaanshaha labada mitir ee xubnaha qoysaska kala duwan markasta.

Learn more at alberta.ca/CovidTranslated

©2018 Government of Alberta